MAXKAMADDA DEGMADA _____
_____, OHIO

Gobolka Ohio/_____	:	
Dacwoode ,	:	
	:	Lambark gal dacwadeedka_____
	:	
Liddi ku ah.	:	Lagu soo eedeeyey _____
	:	
_____,	:	
Eedeysane	:	GARSOORE _____

KA TANAASULIDDA (KA HARID) XUQUUQDA AAD LEEDAHAY MARKA AAD DAMBIGA QIRATO AMA AADAN DIIDANEYN

Waxa aan qirayaa in la igu wargeliyey xuquuqda hoos ku xusan ee uu sharcigu ii ogol yahay:

1. Waxaa la i wargeliyey dambiga (dambiyada) la igu soo eedeeyey iyo qoraal (qoraalo) ay ku cad yihiin dambiyada la igu soo oogey. Waxaan qirayaa in la I siiyey nuqul ka mid ah qoraalkaas (qoraaladaas).

2. Waxa aan xaq u leeyahay in aan bixiyo lacag damaanad ah haddii dambiga aan geystay uu yahay nooca laga bixiyo damaanadda ah Crim. R. 10(C)(3).

3. Waxaa la igu wargeliyey in aaney waajib igu aheyn in aan hadlo inta dhageysiga maxkamaddu socdo isla makaana wax kasta oo aan iraahdo loo adeegsan karo si aniga liddi igu ah. Crim. R. 10(C)(4).

4. Waxa aan fahamsanahay in haddii aan ogolaado in aan dambiga galey ama geystay fal dambiyeedka ay ka dhigan tahay qirasho buuxda oo aan dambiga qiranayo Crim. R. 11(B)(1).

5. Waxa aan fahamsanahay haddii aan ogolaado in aanan ka hor imaan waxyaabaha la igu soo eedeeyey aysan ahayn qirasho aan dambiga qiranayo laakiin ay tahay run ka sheegista waxyaabaha dhacay ee ku xusan qoraalka maxkamadda isla markaana diidmada aanan diidaneyn waxa dhacay aan loo adeegsan karin dacwad liddi igu ah ee mustaqbalka haddii ay ahaan lahayd mid madani ah ama kuwa fal dambiyeedka ah. Crim. R. 11(B)(2).

6. Waxa aan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay in aan diido qirashada dambiyada la igu soo oogey isla markaana aan u gudbo dhageysiga maxkamad. Dambiga oo aan qirto waa diidmada waxyaabaha lagugu soo eedeeyey ee ku xusan qoraalka (qoraalada) maxkamadda. Waxa aan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay in uu dacwadeyda dhageysto qaali ama xeerbeegti haddii dambiga aan galay ay ciqaabtiisu tahay xarig. Waxa aan fahamsanahay in xeerbeegtidu ka kala koobnaaneyso 8 qof oo laga soo xulay bulshada. Waxa aan fahamsanahay in ay waajib tahay in 8da xeerbeegtida isku raacaan go'aankooda. Waxa aan fahamsanahay haddii uu dacwadeyda qaado qaali, in qaaliga kaligiis uu go'aan ka gaarayo in dambiga aan geystay iyo in kale. Waxa aan fahamsanahay haddii aan ogolaado in aan dadmbiga qirto ama aanan ka hor imaan in aan ka tanaasulayo xaqa aan maxkamad ku aadayo oo dacwadda lidiga igu ah ay dhageystaan qaali ama xeerbeegti..

7. Waxa aan fahamsanahay haddii aan ka tanaasulo xaqa aan u leeyahay in aan dhageysiga dacwadda u bandhigo qaali ama xeerbeegti oo aan qirto dambiga ama aanan diidaneyn, waxa kale oo aan ka tanaasulayaa xuquuqda hoos ku xusan:
   - Inaan ka hor imaado qofka dambiga igu soo eedeedyey isla markaana aan su'aalo weydiiyo markhaatiyaashiisa Crim. R. 11(C)(2)(c);
   - In aan soo bandhigo cadeeymahaha dhinacayga ah isla markaana aan maxkamadda hor keeno markhaatiyaal ii marag fura Crim. R. 11(C)(2)(c);
   - Xaqa aan u leeyahay in aan maxakamadda ka hadlo ama aan iska aamuso, Crim. R. 11(C)(2)(c);
   - Xaqa aan u leeyahay in aan racfaan ka qaato go'aanka maxkamadda;
   - Gobolka ayaa mas'uuliyad ka saaran yahay inuu iigu caddeeyo dambiga si aan shaki ku jirin, Crim.

FADLAN BUUXI FOOMKA KU QORAN AFKA INGIIRISIGA

R. 11(C)(2)(c).

8. Waxa aan fahamsanahay haddii aanan heysan dhalashada waddanka Mareykanka, waxaa la igu wargeliyey dambiga aan qirtey ama aanan diidaneyn oo diiwaanka la ii geliyo uu keeni karo in waddanka Mareykanka la iga dhoofiyo ama la ii diido dhalashada waddanka sida uu qabo sharciga dawladda Mareykanka ee R.C. 2943.031(A). Aniga oo taas maanka ku haya waxaa aan maxkamadda la socodsiinayaa in aan:

   Aheyn qof haysta dhalashada dalka Mareykanka . [ ] In aanan heysan dhalashada dalka Mareykanka [ ]

9. Waxaa la igu wargeliyey ciqaabta ugu badan ee qaaligu igu xukumi karo dambiga aan qiranayo isla markaana aan fahamsanahay in ay ka mid noqon karto xarig, ganaax lacageed, saacado shaqo ah, waqti dusha la igala socdo (probation) ama la iga qaado xuquuqda wadida iyo lahaanshaha gaadiidka. Waxa kale oo aan fahamsanahay in dambiga oo diiwaanka ii gala ay kordhin karto ciqaabta aan mudanayo haddii aan dambiyo kale la imaado mustaqbalka. Waxaa intaa dheer, Haddii dambiga la igu qaadey uu yahay mid gaadiidka ku saabsan in la wargelinayo oo loodirayo maamulka gaadiidka ee gobolka Ohio uuna ka mid noqonayo qeyb ka mid ah diiwaankeyga wadida gaadiidka. Maamulka gaadiidku (OBMV) waxa uu qiimeyn ku sameyn karaa inta dhibcood ee diiwanka ii galeysa marka dambiga la igu qaado.

Ka dib Waxa aan si qoto dheer uga fikiray xuquuqda aan leeyahay ee sharciigu ii ogol yahay waxaanan halkan kaga tanaasulayaa (ka harayaa) xaqa aan u leeyahay in qareen i difaaco oo uu ii doodo. Waxa aan sidaa ku go'aansaday iyada oo miyirkeygu dhan yahay; isla markaana aaan doortey; aaney cidina igu khasbin ama igu cadaadin i khasbin markii aan si qoto dheer uga fikirey

_____ _____

TAARIIKH EEDEYSANAHA

_____

Markhaati ama Qareenka Eedeysanaha/Lambarka Qareenka.

FADLAN BUUXI FOOMKA KU QORAN AFKA INGIRIISIGA